

Waraq-Xogeedka Magaalo- Weynta Seattle

Waxa diyaariyey Xafiiska Xiriirinta Dowlad-u-Dhexaadka
Magaalada Seattle • Greg Nickels, Duqa Magaalada
Caddadka 2008

GOOBTA AY KU TAAL

Iyada oo aasaaskeedi hore u ahaa 1869, Magaalada Seattle waxay ku taaalaa Gobolka Washington ee gacanka Puget Sound, waxay 113 mayle (182 km) u jirtaa xadka Mareykanka iyo Kanada. Seattle waa ubacda ganacsiga, dhaqanka iyo teknoolajiyad sare, kana tirsan Woqooyi-Galbeed ee Mareykan Basiifik, ahna Magaalo-weyn oo dekad lagu yaqaan socdaalka Reer Yurub iyo Baayac-mushtarkeeda ku taala. Iyada oo ay ku meersan yihiin buuro iyo biyo, Magaalo-Weynta Seattle agagaaraheeda waxaa laga hee laa meelo qurux badan oo indhuhu-qabtaan iyo meelo badan oo fursad kuu siinaysa madaddaalo sannadka oo idil.

Loolka: 47° 39' Waqooyi Dhigaha: 122° 17' Galbeed

Ifaafada Magaalada

Bedka Dhulka: 84 sq mi (217 sq km)
Tirada Dadka, 2007: 586,200
Cufka Dad weynaha: 6979 dad oo mayl laba-jib. ah (2,701 sq km laba-jib.)

[ed. note: insert Seattle-centric map]

TIRO-KOUBYADA

Tirada Dad weynaha

Sannad	Seattle	Magalo-Weynta Seattle *	Cascadia**
1970	530,831	1,939,000	7,738,635
1980	493,846	2,240,000	9,508,809
1990	516,259	2,748,867	11,000,384
2000	563,374	3,275,847	13,379,320
2007 (qiyaas)	586,200	3,524,000	14,636,386

Ilaha laga soo xigtay: Xafiiska Tirakoobka Mareykanka (Fiiri www.historylink.org); Xisabinta Xafiiska TK (XT Adeegyada Wasaaradda Mamulka); iyo Xafiiska Falanqaynta Dhaqaalaha Oregon. Qiyaasta Seattle 2007 oo laga soo qaatay Xafiiska Maamulka Maaliyadda Gobolka Washington

* Kaawntiyada King, Snohomish, Pierce iyo Kitsap.

**Washington, Oregon iyo British Columbia

Tirada Dadka marka Jinsiyadda (Race) La eego (Isha: xafiiska Tirokoobka Mareykanka, 2005 Cabbiraadda Beesha Mareykanka)

Jinsiyad/Koox Ka-Soo Jeed	Seattle	King Kaawnti	Gobolka Washington
Caddaan	369,689 (68.9%)	1,284,024 (73.1%)	4,988,017 (81.2%)
Madow ama Afrikaan Amerikaan	43,914 (8.2%)	99,819 (5.7%)	202,286 (3.3%)
Cali Beesteenka Mareykanka iyo u-Dhashey Alaska	6,336 (1.2%)	14,739 (0.8%)	88,363 (1.4%)
Aasiyaan	77,363 (14.4%)	233,028 (13.3%)	405,030 (6.6%)
Aasiyaanka Hindida ah	3,111	28,350	41,583
Shiine	20,774	55,771	72,135
Filipino	21,950	44,430	87,871
Japanese	10,808	26,031	40,115
Korean	3,317	22,122	51,929
Vietnamese	10,602	29,952	60,543

Aasiyaanka kale	6,801	26,372	50,854
U Dhalshey Hawaaii iyo Jasiiradaha Kalee Basafiigga	1,666 (0.3%)	10,208 (0.6%)	28,400 (0.5%)
Dadka Hisbaanigga ah/Laatino (jinsiyad kasta)	33,707 (6.3%)	118,558 (6.8%)	541,722 (8.8%)
Jinsiyad kale	16,940 (3.2%)	55,244 (3.1%)	229,830 (3.7%)
WADARTA Dadka	536,946	1,755,818	6,146,338


TAYADA NOLOSHA

Seattle waxay isku darsatay iyada oo leh deegaan dabiici ah oo aad u qurux badan iyo xarun magaalo weyn ay ka dhacayso taasoo leh farshaxan, madaddaalo iyo cuntooyin adduunka looga bogey, Seattle badiyaa darajo ahaan lagu qiimeeyaa inay tahay magaalooyinka ugu haysta Mareykanka iyada oo lagu saleynayo waxyaabaha ay ka midka yihiin heerka waxbarashada, tirad iyo tayada ururada farshaxnaka, helitaanka Internet-ka wireless-ka ah iyo deegaan u fiican dadka lugeynaya

Cimilada

Seattle waxay leedahay xilliy-qabow dhexdhexaad ah iyo xilliy-kuleyl diirimaad ah oo adiga kuu suurto-galinaya waxqabsi dibadeed sannadka oo idil. Heerkulka ugu sareeya waa markay tahay Julaaq waa 75° F (24° C) marka la isku celceliyo, halka Heerkulka hoose xilliyada qabowga ee ay hoos uga dhacdo barafowga kaliya 15 maalmood sannad kasta oo idil. Celceliska roob-da' sannadeed ee Seattle waa 36.2 inji (92 cm, marka la barbar dhigo 19.5 inji (50 cm) ee San Francisco dhexdeeda, 34.5 inji (88 cm) ee Chicago dhexdeeda, 39 inji (99 cm) ee Washington dhexdeeda, DC iyo 40.3 inji (102 cm) oo ah Magaalada New York.

[ed note: -- include "Monthly Temperature and Rainfall in Seattle" graphic] **Need to edit graphic, clarify inches vs. Fahrenheit**



Tusmo Qiime nololeed/Kireysi Xafiis, 2007

Jaantuuska qiimaha noloshu ee 2007 oo laga oos xigtay www.finfacts.ie Nofember 2007 Xafiiska xogta kiradao lga soo xigtay Richard Ellis

Guryaha

Qiimayaasha iibinta dhexdhexaadka ee guryaha hadda jira ee qoyska-kaliya ah, rubuc -sannad 3^{aad} (doolarka Mareykanka)

Dallas

\$150,900

St. Louis	\$145,400
Denver	\$253,200
Chicago	\$276,600
Seattle	\$386,900
Washington, D.C.	\$430,800
New York	\$469,700
San Diego	\$588,700
San Francisco	\$805,400

*Isha laga soo xigtay: Ururka Guryo(dhul) iibiyayaasha Qaranka www.realtor.org
[ed. note: 2007 info above, create graph to demonstrate it. see previous data sheet]*

Kireysashada

Isku cel-celiska qiimaha kireysiga abaarmanka bishii kasta ee gudaha King Kaawntiga, Maarso 2007

Qol Istuudiy ah	\$742	Hal-qolseexad	\$842	Laba-qolseexad/Laba-Qubesysi	\$1,127
-----------------	-------	---------------	-------	------------------------------	---------

Isha laga soo xigtay: Warbixinta Dhul iyo Guryo Iibinta Puget Sound Dhexe, Gugii 2007

Dakhliga Dhexdhexaadka ee Qoyska

Magaalo-weynta Seattle*

2002	\$77,900	2006	\$74,300
2004	\$72,600	2008	\$81,403

Isha laga soo xigtay: Xafiiska Degmada ee Horumarinta Guryaha iyo Beladka

Xiriirka: www.huduser.org/

** Waxa ku jira Seattle, Bellevue iyo Everet*

WAXBARASHADA

Dadkaka 25 sano ka weyn, isku eegid magaalooyinka mareykanaka ugu waaweyn, boqolleyda dhammaaneysa:

	Dugsiga Sare	BA ama ka Sareeya
Seattle	91.9	52.7
San Francisco	84.5	50.1
Washington, DC	83.6	45.3
Atlanta	83.0	42.4
New York	79.0	32.2
Chicago	77.5	29.9
Miami	63.3	20.3
Detroit	76.1	12.1

Isha laga soo xigtay: Xafiiska Tirakoobka, cabbirka 2005 ee Mareykanka

Dugsiyada Dadweyne iyo Kan gaarka

Wadarta isdiiwaangelinta Dugsi ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle laga bilaabo Oktoobar 1, 2007, ayaa ahayd 45,933. Waxa jira in ka badan 300 dugsi gaar loo leeyahay iyo kuwa diinta ku lug leh ee Seattle.

Jaamacadaha iyo Kulliyadaha ugu Waaweyn

	Tirada Ardayda	Hoyga Internet
Jaamacadda Washington (Shacab)	45,380	www.washington.edu
Kulliyadaha Beesha Seattle , afar xero (Dadweyne)	39,601	www.sccd.ctc.edu
Jaamacadda Seattle (gaar loo leeyahay)	4,253	www.seattleu.edu
Jaamacadda Seattle Baasifik (gaar loo leeyahay)	3,842	www.spu.edu
Machadka Farshaxanka Seattle	2,561	www.ais.edu
Kuliyadda Kornish ee Farshaxanka (Jaantus qoritaan waxay ahayd 2007).	800	www.cornish.edu

GOOBAHA WAXTARKA U LEH BEESHA

Daryeelka Caafimaadka

Agagaaraha Seattle ayaa ah xarunta daryeel caafimaadka ee Baasifik Woqooyi-Galbeed Mareykan.

Goobaha ugu waaweyn ee caafimaadka waxa ka mid ah Xarunta Caafimaadka Iswedish , Isbitaalka Jaamicadda Washington iyo Qaybta Daawada, Xarunta Caafimaadka Harborview, Isbitaalka Iskaashatada Caafimaadka Kooxaha, Xarunta Caafimaadka Virginia Mason, Isbitaalka Woqooyi-Galbeed, Isbitaalka Guud ee Valley, Isbitaalka Carruurta iyo Xarunta Cilmi-Baarista Kaansarka Fred Hutchinson (oo leh barnaamijka cilmi-baarista adduunka ugu weyn ee xigmeynta iyo ka hor-tagga kaansarka).

Diinta

Dhammaan diimaha waaweyn ayaa laga mattalaa magaalo-weynta Seattle. Waxa intaas u sii dheer kaniisadaha kala duwan ee Barotestant, Romaan Kaatolik iyo Orthodox-ka Bari, iyaga oo jira synagogue-yo yuhuudi ah, meelaha caabdika Buddhist-ga iyo masjidyaada Islaamka..

Goobo Dhaqameed iyo Madaddaalo

Dhaqameed		Madaddaalo	
Goobaha Taariikhiga ah	37	Goobaha Tennis-ka	156
Xarunta Tumidda Farshaxanka	37	Wadiiqooyin la Dayac-tiro	72 miles
Maktabadaha Dadweynaha	30	Jardiinooyin	61 jardiinooyin deegaan
Xarumaha Beesha	28	Naadiyada Isboortiga	42
Matxafyada	17	Miidaanka Cayaaraha	33
		Meeelaha lagu Dabbaasho	10
		Xeebaha	9
		Goobaha Golf-ga lagu Ciyaaro	5

DHAQAALAHA

Seattle waa xarun balad degmo oo magaalo-weyn kasoo lahaato kooban afar-kaawnti oo leh 3.58 maalaayiin oo dad iyo 1.8 maalaayiin oo shaqooyin. Loo-shaqeeyaha ugu weyni waa **Jaamacadda Washington** oo leh 28,188 macallimiin iyo shaqaale kale, miisaaniyad \$3.7 bilyanna iyo miisaaniyad cilmi baaris oo dhan \$1.02 (ka eeg Warbixin Sannadeedkii 2007 www.washington.edu/admin/finacct/annual.report.archive.html). Jaamacadda ayaa ka qaadata kaalin muhiim u ahqaybaha dhaqaale ee ay ka midka yihiin daryeelka-caafimaadka, bayoteknoolajiyadda, sayniska iyo cilmi-baariista

Daryeelka-caafimaadkeeda rucubeysan ee Seattle (isbitaallo, waxyaabaha la soo saaro daryeelka-caafimaadka iyo adeegyada, tababbarka iyo cilmi-baarista) ayaa u dhigma 96,000 oo shaqooyin, ku biiriyana \$10 sannadkiiba dhaqaalaha agagaaraha (ka fiiri wax-soo-saarayaasha ugu muhiimsan www.seattle.gov/economicdevelopment/). Qaybta **bayoteknoolajiyadda** iyo **aaladda caafimaad**, oo darajadeedu tahay ka 5^{aad} Mareykanka marka loo eego meel isku-ururka wax-soo-saarayaasha, oo ka kooban 170 meheradood iyo ururo macaash-la'aan ah oo cilmi-baaris ah dhammaanteed degmooyinka Gobolka Seattle/Washington ku taal (Eeg www.wabio.com/). Kaalinta adag ee Seattle ay kaga jirto daryeel-caafimaadka, bayoteknoolajiyadda iyo teknoolajiyadda macluumaadka ayaa u horseeday horumaryo iskaashi dhinaca **bayoinformatics** (isticmaalka database-yo iyo algorithm-yo sidii ay u xoojin lahayd cilmi-baarista bayoolojiga) oo **caafimaad informatics** (u isticmaalka teknooloojyadda kombiyuuterka ururinta, keydinta, isgaarsiinta, sida ugu wacan ee loo isticmaalo data ku lug leh caafimaadka).

Qaybaha Daryeel-caafimaadka iyo bayoteknoolajiyadda Seattle ayaa ka faa'iideystay deeqaha uga yimid **Ururka Samafalka ee Bill iyo Melinda Gates** oo ah \$30 bilyan oo raasamaal saafi ah. Miisaaniyada ururka ayaa ka caawisay Jaamacadda Washington inay isku meel isugu geyso **Waaxda Saynisyada Hidde-Sidayaasha iyo bayoenjineering** goob cusub oo ay abuurto **Waaxda Caafimaadka Caalamka** (oo ay wadajir uga wada shaqeeyaan dugsiyada Caafimaadka Dadweynaha iyo Daawada). Xaafadda South Lake Union ee ku dhow Jaamicadda yaa noqotay meel xarun u ah bayoteknoolajiyadda iyada oo arrintaas mahadda ku leedahay maal-galinta gaarka ah ee Vulcan, bayotek nidaamiyaha (incubator) \$15 maalaayiin lagu abuuray iyo u dhawaanshaha Xarunta Cilmi Baarista Kaansarka Fred Hutchinson, machadka Systems Biology, Pacific Northwest National Laboratory (xafiiska Seattle), Xerada Amgen's Helix ee ku taal Elliot Bay, machadka Allen ee Sayniska Maskaxda, Machadka Cudurda la Isku-Dhaafiyo, PATH (Barnaamijka Teknooloojyadda Caafimaadka ku Habboon), Machadka Cilmi-Baarista Seattle "Biomedical" iyo Machadka Cilmi-Baarista Benaroya ee ku taal Virginia Mason.

Meheradaha ku Lug leh Diyaaradaha (Aerospace) ayaa horeyba u ahayd goob wax soo saar oo muhiimad u leh degmada Seattle, iyada oo mahad naqa iska leedahay shirkadda Boeing. Laga bilaabo Maarso, 2008, ayaa Boeing waxay shaqo siisay 74,517 qof oo ku nool Seattle iyo Washington (Wadarta shaqo bixinta shaqadu waa 161,493). Markii ay ahayd 2007, biximaha Boeing ee 3,007 ee shirkaada u adeega ee Seattle iyo Washington ka jira ayaa dhaaftay \$3.2 bilyan. Diyaaradaha cusub ee Boeing ee nooceedu yahay 787 ayaa waxaa lagu sameeyaa magaalada Everett ee woqooyiga Seattle.

Waaxda **Teknooloojyadda Macluumaadka (Information Technology)** ee gobolka Gobolka Seattle/Washington ayaa waxay ka mid yihiin 3,000 oo shirkadood oo leh shaqaale wadartoodu tahay 191,000. Microsoft, oo xarunteeda iyo goobaha kale cilmi-baarista iyo horumarin ku leh agagaarka Seattle, ayaa shaqaaleysa 35,510 oo qof oo ku nool Seattle iyo gobolka Washington. Microsoft waxay aduunkoo idil ku leedahay shaqale gaaraya 78,565.

Agagaaraha Seattle ayaa hoy u ah dhowr shirkadaha ugu sita casnimada kuwaasoo ka mid ah waaxaha kambaniyada qaarkood. Waxaaha "Tamarta Habboon" (Smart Energy) ee Washington, Oregon, iyo British Columbia yaa lagu qiyaasayaa inay ku jiraan 225 shirkadood oo leh maaliyad ka badan \$1.9 bilyan oo ay u dheer yihiin \$150 maalaayiin oo kale oo ah miisaaniyad cilmi-baariisyo horumarin. **Farshaxanka** oo ka mid ah waax dhaqaale ayaa darjadeedyu tahay ka 5^{aad} marka magaalooyinka waaweyn ee Mareykanka oo waxa ka mid ah 3,578 meherado farshaxanka-la-xiriira oo shaqaaleeya 18,493 oo qof (sida u sheegayo Warbixin Meheradaha Hibada leh oo ay soo saaraty Mareykanka u heellan farshaxanka 2007-dii). Waaxda farshaxanka ayey ka mid yihiin meheradaha **aflaanta iyo fiidiyaha**, iyo kuwa **muusikada** oo 2004 soo saaray dakhli xoogsi ku yimid oo ah \$266 maalaayiin, isku dar wax iibin gaareysa \$1.3 bilyan, iyo shaqo-bixin ah 10,700 shaqooyin oo ak mid ah 3,000 oo meherado muusika-la-xiriira. Seattle waa xarunta meheradaha **kafeega Gormeega ah** oo sii kobcaya (Starbucks oo saldhigeedu yahay Seattle ayaa adduunka ka caan ah); waax firfircoon **Qalabbada Madadaalada** ku lug leh (mahadda wax aiska leh ururada aya ka midka yihiin Mountaineers (Buur-Fuulayaasha) iyo shirkadaha ay ka midka yihiin K2 Sports, REI, Filson iyo MSR); iyo waaxda **badaha iyo kaluumeysiga** qaranka ugu weyn (ka dhoofinta kaluumeysiga Washington ayaa ka badan marka la isku daro dhamman gobollada kale ee Mareykanka wax ay dhoofiyaan iyada oo ku saleysan labadaba qiimaha iyo miisaanka). Waaxaha muhiimka ah ee kale waa **alwaaxda, qalabbada gaadiidka, cuntooyinka** iyo **dhar sameynta**.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah fiiri www.seattle.gov/economicdevelopment ; iyo www.seattletradealliance.com

Wadarta Shaqaaleynta iyo Qiyaaast wakhtiga soo Socda

Tirada jagooyinka wakhtiga-buuxa iyo wakhtiga-nuska ah (oo ayna ku jirin kheyraadka iyo dhismaha)

Sannad	Seattle	King Kaawnti	Magalo-Weynta Seattle *
1980	386,684	697,401	1,033,407
1990	469,802	972,567	1,445,243
2000	536,471	1,188,577	1,748,793
2006	470,698	1,125,197	1,615,507
2020 (projection)	653,514	1,498,043	2,224,597

Laga soo xigtay: Guddiga Degmada Puget Sound

*Kaawntiyada King, Snohomish, Pierce iyo Kitsap.

Ciidamada Mareykanka

Waaxda Difaaca ayaa ah loo-shaqeeyayaasha ugu weyn ee degmada Puget Sound. Goobaha ugu waaweyn waxa ka mid ah Saldhigga Ciidanka Fort Lewis, Xerada-maraakiibta Ciidanka Badda ee Bremerton, Saldhigga Ciidanka Badeed Gujis ee Bangor, Saldhigga Ciidanka Cirka McChord iyo Rugta Ciidanka Badda ee Everett.

Shaqooyinka ee Qeybaha Dhaqaalaha, 2007

Agagaaraha Magaloweynta Seattle: Kaawntiyada King, Kitsap, Pierce iyo Snohomish

Waaxda	Tirada Shaqeysa	% Wadarta Shaqeysa
Waaxaha Soo Saara Badeecadaha	322,100	18 %
Wax Dhisitaanka/Kheyraadka Dabiiciga	133,400	7 %
Wax soo-Saar Warshado	187,700	10 %
Shirkada ku Lug leh Dayaaradaha iyo Cirka	77,100	4%
Badeecadaha Kale ee Waara	74,100	4%
Badeecadaha aan Waarin	37,600	2%
Waaxaha Soo Saara Adeegga	1,507,200	82 %
Ganacsiga Jumlad/Tafaariq ah	278,800	15.4%
Gaadiidka, Isticmaalka Dadka	64,200	3.5 %
Macluumaad	87,800	4.5 %
Hawlaha Maaliyadeed	108,800	5.9 %
Adeegyada xirfad-aqoonka iyo Meheradda	245,500	13.4 %
Adeegyada Kale	440,500	22.1 %
Dowlad	281,600	15.3 %
Gobolka iyo Degmada	232,700	
Dowlada dhaxe	48,900	
Wadarta Shaqaaleyn	1,829,300	

Isha laga soo xigtay: Desember 2007 Saadaaliyaha Dhaqaalaha Puget Sound

SHAQOYINKA-GAARKA AH IYO MEHRADAHA

Shirkadaha dadweyne ee ah 10 ka uga sareeya ee ku yaal Magaalo-Weynta Seattle (Xaruntoodu ku taal Seattle/Gobolka Washington).

(laga darajeyey dhakhliga saafiga ah ee soo galey 2006, Ku xisabsan maalaayiinaad).

Shirkadda	Dakhligii 2006	Nooc Meherad
Costco	60,151	Dukaamo Xubin-ka-noqosho – www.pricecostco.com
Microsoft	44,282	Soo saare Software – www.microsoft.com
Washington Mutual	26,284	Bangi – www.wamu.com
Weyerhaeuser	21,896	Soo Saaraha Waraaqaha iwm. – www.weyerhaeuser.com
Paccar	16,454	Sameeye Taragyada Shaqada Culus qabta – www.paccar.com
Amazon.com	10,711	Ganacsade Onlayne ah – www.amazon.com
Nordstrom	8,560	Ganacsade Dhar – www.nordstrom.com
Starbucks	7,786	Shirkad Kafee – www.starbucks.com
Safeco	6,289	Adeegyada Caymiska/Lacagaha – www.safeco.com
Expeditors International ee WA	4,625	Shirkad Isku-Duwidda Caalamiga ah – www.expd.com

Laga soo xigtay: Joornaalka Meheradda Puget Sound, Buugga Liisaska 2007

Xafiisyada Bannaan ee Magaalo Dhexaadka Seattle, Rubuc Sano 4^{aad}, 2007


	Wadarta Inta Jirta (sq ft)	Saami Bannaan	Saamiga Baayaca (sq ft kasta)
Ku Jiritaanka Guud	38,450,614	9.43%	N/A
Heerka A ee Ugu Cusub	28,771,366	8.33%	\$23.00–\$50.00
Weyni Ka Horeyn Heerka B	7,545,661	13.60%	\$20.00–\$36.00
Ka Horreyn Heerka C	2,148,174	9.55%	\$17.00–\$30.00

Laga soo xigtay: CB Richard Ellis

Saamiyada Baratansiinta Korantada (2007)

Isku celi-celinta saamiyada korantada ee goobaha ku noolaanshaha, ganacsiga iyo warshadaha marka la eego magaalooyinka ugu waaweyn ee Mareykanka;

Xisaabtinta oo sentiyo marka loo eego kilowatt saac.



Isha laga soo xigtay: Korantada magalaga Seattle, Qaybta Qaaliyadda * Shirkadaha isticmaalaka ee Guud ahaan loo leeyahay Xiriirka: Robert Bartley, Seattle City Light robert.bartley@seattle.gov, 206-684-3877)

Biyaha

Adeegga biyaha waxaa biixya Magaalada Seattle. Cadaadiska wuxuu u dhaxeeyaa 30 psi ugu yaraan iyo 100 ps ugu badnaan. Saamiga bishii kasta ee ganacsiga/warshadaha ee ¾” - 4” meter waa \$8.05-\$79.00. Ku dallaca isticmaalka biyuhu waa sida soo socda:

Xilliga isticmaalka-yar (Setembar-Mey)	\$ 2.62/100 cu f
Xilliga isticmaalka ugu badan (Mey- Setembar)	\$ 2.88 – 8.55 /100 cu ft

Bullacadaha Nadaafadda (Sanitary Sewer)

Adeegga waxa bixiya Warshadda Nadiisinta King Kaawnti oo biilka waxa qaada magaalooyinka gooni ahaantooda. Saamiga ganacsiga/warshadeed ee Seattle gudaheedu waa \$7.75/100 cu. ft.

Gaaska Dabiiciga ah (Natural Gas)

Tamarta Puget Sound ayaa siisa Seattle iyo King Kawntiga gaaska dabiiciga.. Saamiga saldhigga ah ee bishii kasta ganacsiga/warshadeed ee adeegga guud waa \$15 lagu daro \$1.176 therm. kasta

Ilaha Istimaalda: www.seattle.gov/util/services/

Saamiyada Cashuurta Magaalada Seattle, 2007

Cashuurta Milkiyadda (saamiga Qiyaasta Qiimaynta marka loo eego 1,000ba)

Gobol	\$2.33
Magaalo	3.22
Kaawnti (ka mid yihiin Medic 1/EMS)	1.50
Dugsiyo	2.01
Deked	0.23
Wadar: \$9.28 per \$1,000 qiimaha la qiyaasey, ururisey King kawnti	

Cashuurta Ku Jiritaan meheradda Guud	Magaalo	Gobol
Meheradaha Tafaariiqda (Oo ay ku jiraan Adeegyada)	.215	.471
Soo Saarka Kheyraadka	.215	.484
Warshadeynta –Daqiiqada ama Badarka Jumladaynta ah	.0215	.138
Warshadeynta iyo Nidaaminta Shaqo galin ah	.215	.484
Jumladayn	.215	.484
Adeegga iyo Dhaqdhaqaaqyada kale ee Meheradeed	.415	1.5
Daabaca iyo Daabaca Buugta iwm.	.215	.484
Ka Shaqeystayaal Booqashooyinka	.215	.275

La xiriirka: Magaalada Seattle, Dakhliga & arimaha Macamiisha rca.bizlixtx@seattle.gov (206) 684-8484

Cashuurta Iibinta Tafaariikhda oo 9.0% loo qoondeeyey sida soo-socota:*

Gobolka Washington	6.50%
Magaalada Seattle	0.85%
Metro-ga	0.90%
Sound Transit	0.40%
King Kaawnti	0.15%
Cashuur u Qaadka King Kaawnti Cadaaladda iyo Dembiyada	0.10%
Cashuurta caafimaadka Maskaxda King Kaawnti	0.10%

Isha laga soo xigtay: Waaxda maaliyadda, Magaalada Seattle

*Cashuur dheeraad oo ah 0.5% ayaa laga qaadaa cuntada iyo sharaabka lagu iibiyo maqaayadaha, tavern-yada, iyo baararka ku yaal King Kaawnti. (la aasaasay 1996 si loo taageero bixinta dhismaha istaadiyamka baseball-ka oo cusub laga sameeyo Seattle).

XARUMAHA DALXIISKA IYO SHIRKA

Agagaaraha Seattle-King ayaa soo jiita dad ka badan 9.4 maalaayin oo ah booqde u dhaxayaal magaalo kuwaasoo ku kharash gareeya 4.75 bilyan oona ku soo kordhiya \$419 maalaayin dakhliga cashuurta gobolka iyo degaanka. Dadka booqdeyaasha ayaa lacagta ay qarash gareeyaan ayaa waxay si toos ah u taageertaa 62,000 shaqooyin oo ku yaal degmada Seattle. Degadda Seattle ayaa yeelatay sannadahan dhow koritaan markabyada tamashla ah oo aan horay loo arag, iyada oo shan shirkado waaweyn oo maraakiibta tamashlaha ah oo rakaab dad lagu qiyaasay 390,040 ay raaceen 2007-dii iyo oo lagu xisaabtamayo 434,000 sannadka 2008.

Xarunta Shirka & Ganacsiga ee Gobolka Washington, xarunta Seattle (goobta lagu qabtay Carwadii Aduunka ee 1962) iyo hoteellada magaalada ayaa ku caanbaxey inay yihiin meelo xiiso u leh shirarka, shirar weynaha iyo munaasabada gaarka ah. Meelaha kale ee waxtarka badan leh ayaa waxaa ka mid ah Xarunta Shirarka Caalamiga ee Bell Harbor, Xarunta Munaasabada Qwest Field iyo Xarunta Meydenbauer oo ku taal Bellevue. Si aad u hesho macluumaadka booqdaha kala xiriir: Xafiiska Booqdeyaasha iyo Shir-Weynaha Seattle oo lambarkoodu ah 732-2695 ama (206) 461-5840 ama www.visitseattle.org. Xarunta Booqdeyaasha Seattle iyo Adeegyada Soo-Dhaweynka waxay ku taalaa gudaha Xarunta Shir-weynaha, oo bixisa maclumad ku saabsan Seattle, tigidhada meelaha xiisaha iyo ballan ka qabsiga meelo tusitaanka.

Huteellada

Farasmagaalaha-dhaxe ee xaafadaha ganacsiga ee Seattle waxa ku yaal 11,890 ee qolal huteel iyo in ka bada 32,000 qolal huteel ayaa ku yaala aaga Kaawntiga Seattle/King agagaaraheeda. Sannadaha 2008 iyo 2009 gudahiisa, waxaa la filayaa in la furo 1,500 oo ah qolal-martiyeed. Fiiri www.seattlesupersaver.com ama wac c (800) 535-7071 si aad u hesho macluumaad ama meel aad ka qabsato ku dhowaan 90 huteel oo ku yaal agagaaraha (barnaamijka Lacag Badan Kaga Keysiga Seattle waa adeeg huteel meel ka qabsi lacag la'aan ah oo ay maamulaan Xafiiska Booqdeyaasha iyo Shir-Weynaha Seattle).

Isha laga soo xigtay: Xafiiska Booqdeyaasha iyo Shir-Weynaha Seattle

Maqaayadaha

Agagaaraha Seattle waxay caan ku tahay cuntooyinka badda laga soo saaro oo daray ah, iyo wax soo saarka beeraha iyo waxyaabaha kale u gaarka ah Woqooyiga-Galbeed. Maqaayado badan oo qowmiyado kala duwaan ka soo jeeda ayaa ka mid ah 9,000 ee maqaayadood ee ku yaal Magaalo-Weynta Seattle (eeg www.seattle.citysearch.com).

Meelaha la Xiiseeyo ee ugu Waaweyn

Meelaha la xiiseeyo ee baladka ugu caansan ayaa waxaa ka mid ah Xarunta Seattle iyo Irbadda Hawada Sare, Suuqa Pike Place, Hiram Chittenden Locks (qalab doonyaha lagu kala maamulo), Zoo-ga Jardiinada Woodland, Tuulada Iindiyanka ee Tillicum, Aquarium-ka Seattle, xeebta, dhinac-hareed, iyo xeebo ammaan leh, Pioneer Square, Xaafada Caalamiga, iyo agagaaraha khamri -canabka iyo khamriga kale lagu sameeyo. Waxqabayada dibadda loogu baxo ee ay ku jiraan dooni kaxaysiga, kalluumaysiga, isboortiyada biyaha, lugeynta, biskileet wadashada, buur fuulitaanka iyo ku dul taraaraxa barfaka. Seattle waxay ku taal xeebaha Warta Washington, Warta Union iyo Puget Sound, iyada oo dhinca ka qabtaan laba buuraley silsilado weyn ah (Olympics iyo Cascades), oo buurta Mount Rainier si buuxda ay u muuqato iyo duurka fog oo jira wax ka yar hal saac. Waxa ku dhow Jasiiradaha San Juan, Xeebaha Badweynta Basafiigka iyo wabiyo waaweyn. Ka eeg www.visitseattle.org si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Farshaxanka, Dhaqanka iyo Feestooyinka

2007 daraasad uu sameeyey ururka "Americans for the Arts" (Dadka Mareykanka ah ee Taageera Farshaxanka) sida ay sheegeyso, Seattle ayaa darajada 5ta ugu sarreeya ka mid ah magaalooyinka Mareykanka marka la eego farshaxanka iyo meheradaha la xiriira farshaxanka. Meelaha farshaxanka waxa ka mid ah Seattle Symphony (oo muusika ku tuma Qol-Weynaha Benaroya), Seattle Opera iyo Baaleega Woqooyiga-Galbeed Baasifik (oo muusika ku tuma Qol-Weynaha Marion Oliver McCaw), gaaleriyo farshaxan oo badan, Matxafka Farshaxanka Aasiyaanka Seattle, Matxafka Mashruuca Dareenka Muusikada "rock and roll", Matfaha Farshaxnka Seattle iyo Jardiinada Dhagaxa-qoran ee Olimbiik (oo laga furay xeebta Seattle markay ahayd Janaayo 2007) Seattle waxay qani ku tahay farshaxanka riwaayadaha oo ay ka jiraan 80 shirkadood, oo 25 ka mid ah ba yihiin kuwo xirfaddooda u go'ay. Feesootooyinka kale ee loo dabaal-dego ayaa ka ka mid ahsida SEAFAIR, Northwest Folklife, Munaasabadda Aflaanta Caalamka Seattle, Munaasabadda Farshaxanka Bumbershoot, Munaasabadda Riwaayadaha Carruurta ee Caalamka, Munaasabadda Cuntada ee Seattle, Munaasabadda Buugta ee Woqooyi-Galbeed. Seattle waxay marti galisaa munaasabo muusik oo aad u waayen oo waxay kasbatey u soo jeedsiga adduunka inay tahay meel ay ka bilaabanto muusika kooxa u horseeda ee noocyada ah "rook, pop iyo jazz-ka". Xafiiska Booqdeyaasha iyo Shir-Weynaha Seattle ayaa ku bixiya jadwal la baaran-karo oo dhammays-tiran barteeda shabakadda internetka si loo helo qorsheysi socdaal habboon, bartuna waxy ku taal www.visitseattle.org

Ciyaaraha

Seattle waxay hoy u tahay beesboolka Mariners, fuutboolka Seahawks, kubadda koleyga SuperSonics, Kubadda cagta ee Seattle Sounders iyo Ku Ugu Badiyey WNBA Adduunka 2004 oo ah Seattle Storm (kubadda koleyga ee haweenka oo shaqo xirfad-yaqaannimo loo ciyaaro).

**Ururka Kooxaha Waaweyn Kubadda Cagta yaa ku dhawaaqay inay Seattle heli doonto koox MLS oo rasmi ah muddada xilliga 2009.*

Kooxda Seattle ayaa ku ciyaari doona dhammaan baratanka hoyga Miidaanka Qwest

Saameynta Dhaqaale ee Socdaalka

Seattle-King Kaawnti iyo Gobolka Washington 2007

	Seattle-King Kaawnti	Gobolka Washington *
Shaqooyinka Socdaalka-abuurey	52,100 shaqooyin	149,800 shaqooyin
Kharashyada Socdaal	\$ 6.85 bilyan	\$ 14.81 bilyan
Ka Kasabyada Meherad Socdaal	\$ 2.16 bilyan	\$ 4.01 bilyan
Risiidyada cashuurta Gobol	\$ 242.2 milyan	\$ 827 milyan
Risiidyada cashuurta degmada	\$ 166.1 milyan	\$ 254 milyan

*Isha laga soo xigtay: Warbixinta waxa diyaariyey Ururka Gobolka Washington ee Dean Runyan *Waxa ku jira istaastika Seattle-King Kaawnti*

Xiriirka: (www.deanrunyan.com/impactsWA.html)

GANACSIGA CAALAMIGA

Degmada Magaalo-Weynta Seattle ayaa badanaa ictiraaf ku hesha tayada ku noolaanshaheeda iyo taratankeeda caalamiga ah. Waxyaabaha ay ku wanaagsan tahay degmada waxa ka mid ah ku oolka juqraafi meelsha ugu habboon (fogaan isle'eg u jirtaan London iyo Tokyo), awooddeda warshadeynta, gaadiid iyo isgaarsiin heer sare ah, isku urur teknoolojjida muhiim ah oo heer sare ah, qaybaha teknoolojiyadda oo iskaashada, saldhig dhaqaale kal duwan, laga bilaabo beeraha iyo adeegyada illaa ganacsiga caalamiga), goobo waxbarasho iyo daryeel caafimaad oo tayo leh laga helo, xoog shaqaale aad u mutacallimiin u ah, fursado dhaqan iyo madaddaalo lagu helo iyo khihradaha iyo aragtida caalamiga ee dadkeeda.

Gobolka Washington darajada koowaad ayuu ku haystaa dhoofinta marka tirada dadkeeda loo ego, taasoo lacag ahaan lagu qimeeyey \$8,384 markay ahayd 2005. 2007 qiimaha dhoofinta laga diray Gobolka Washington ayaa ahaa \$66.26 bilyan, iyada oo aan lagu darin dhoofinta software-ka kombiyuuterada (oo lagu qiyaaso \$5 illaa \$10 bilyan sannadkiiba), dajinta naqshadda dhismayaasha iyo injineernimada ama adeegyada xirfad-yaqaanimada. Ganacsiga caalamiga ayaa ah marka la eego saddexdii shaqo mid ka mid ah dhaqaalaha deegaanka. Xiriiriyada ganacsi ee dalka dibaddiisa ayaa u weheliso madannimo, dhaqan iyo xiriiriyada shaqsiyaad oo aad xoog u leh ayey ka mid yihiin wada bahow magaaloooyinka, kaawnti iyo gobol walaalaha kale oo ay xiriiryo adduunka oo idil la leeyihiin.

Isbaheysiga Horumarinta Ganacsigae Magaalo weynta Seattle

Isbaheysiga Horumarinta Ganacsiga ee Magaalo weynta Seattle waxay shuraakow ay la leeyihiin Magaalada Seattle, Magaalada Everett, Dekedaha Seattle, Takoma iyo Everett, Guddoonka Ganacsiga Magaalo-Weynta Seattle, King Kaawnti, Snohomish Kaawnti, Pierce Kaawnti iyo hoggaanka midowga ayaa loo abuuray si ay ugu horumariyaan agagaaraha Magaalo weynta Seattle inay noqdaan irriddaha ganacsi caalami iyo xarumaha baayac-mushtarka ee ugu wanaagsan Woqooyiga Ameerika. Isbahaysiga Ganacsiga ayaa abaabula ergooyin meheradeed, marti-galiya waftiyada ganacsi, oo bixiya macluumaad ku saabsan degmada. Si aad u hesho macluumaad dheerad ah, wac (206) 389-7301, email: tdags@seattlechamber.com ama fiiri barta shabakadda internetka ee ku taal www.seattletradealliance.com

10ka Shuraakaha Ganacsi ee ugu Sarreeya

Ku saleysan dhoofintii 2007 ka bilaabantay Gobolka Washington, lagu qiyaaso bilaaliyiin doolarka Mareykanaka ah(\$)

1. Shiinaha (Dalweynaha)	9.61
2. Japan	7.71
3. Kanada	7.58
4. Indiya	5.77
5. Korea, Jamhuuriyadda	2.99
6. Imaaraadka Carabta ee Midoobey	2.93
7. Shiinaha (Taiwan)	2.84
8. Ayarland	2.39
9. Faransiiska	2.32
10. Singapore	1.94

WADARTA DHAMMAAN WADDAMADA **66.26**

Isha laga soo xigtey: Waaxda Arrimaha Dibada ee Gobolka Washingtonqeybteeda Jaaliyada, Horumarinta Ganacsiga iyo Dhaqaalaha

10ka Ugu Sareeya ee Dhoofinta ee Qeybaha Bahweynta-Meheradaha

Ku saleysan dhoofintii 2007 ka bilaabantay Gobolka Washington, lagu qiyaaso bilyanno doolarka Mareykanaka ah*

1. Diyaaradaha, Dayax-gacmeedyada iyo Qaybahooda lagu Hagaajiyo	41.80
2. Badarka Geed-Gaabka ah	2.86
3. Miraha Saliidda, iwm., waxyaabo kala duwan. badar, Miraha Qudaarta	2.71
4. Mashiinada Warshadaha, oo ay ku jiraan Kobiyuutarada	2.66
5. Mashiin Koronto, Qalab Maqal, Qalab TV, Qalabyo Dayac-Tir	1.76
6. Qalabka Indhaha, Swirka iwm., Cafimaad ma Qalliin	1.56
7. Shidaal Macdan ama Saliid	1.12
8. Loox amd Sheyada Looxa laga Sameeyo	0.85
9. Waraaqaha iyo Tabbeelo-Waraaq	0.80
10. Kemi. Nolol la'aanta; Walaxda Dhifta ah ee Qaaliga ah Birta & Radioact ah	0.80

WAAXDA DHAMMAAN BAHWEYNTA-MEHERADAH **66.26**

Isha laga soo xigtay: Waaxda Arrimaha Dibada ee Gobolka Washingtonqeybteeda Jaaliyada, Horumarinta Ganacsiga iyo Dhaqaalaha, xogta MISER

*Kuma jiraan qiimaha adeegga waxyaabaha la dhoofiyo ee ay ka midka yihiin software, waxbarashada, adeegga dhismayaasha iyo bahweynta meherad ee sida fiican uga jiran agagaraka Seattle. Fiiri: <http://www.cted.wa.gov/>

[ed. note: insert North Pole centric map showing Seattle in relation to Asian, European and other American cities]

Magaalooyinka kale Walaalinimo Kula Bahoobey Seattle

Iyada oo leh 21 magaalooyiin oo walaalinimo kula bahoobeen Seattle waxay leedahay barnaamijka magaalooyinka waalnimada ku bahooye ee labaad ee ugu weyn marka la eego Mareykanaka.

Kula qoran taariikhda la aasaasey

Kobe, Japan (1957)
Bergen, Norway (1967)
Tashkent, Uzbekistan (1973)
Beer Sheva, Israel (1977)
Mazatlan, Mexico (1979)
Nantes, Faransiiska (1980)
Christchurch, New Zealand (1981)
Mombasa, Kenya (1981)
Chongqing, Shiine (1983)
Limbe, Kameroon (1984)
Galway, Ayrland (1986)

Reykjavik, Iceland (1986)
Daejon (Taejon), Korea (1989)
Kaohsiung, Taiwan (1991)
Pécs, Hungary (1991)
Cebu, Philippines (1991)
Perugia, Talyaaniga (1991)
Surabaya, Indonesia (1992)
Gdynia, Poland (1993)
Haiphong, Vietnam (1996)
Sihanoukville, Kambodia (1999)

GAADIIDKA

Adeegga Tareennada iyo Baska

Burlington Northern iyo Union Pacific ayaa bixiya adeeg iskaga-gudubqaaradeed yaa Seattle ka howlgaliya sedex boosteejo gaadiid oo kala duwan. Adeegga rakaabka ee taga magaalooyinka ugu waaweyn ee Mareykanaka waxa bixiya Amtrak. Jidad kala duwan oo baska ah ayaa isku xira magaalooyinka waaweyn ee Mareykanaka, Kanada, iyo meelaha illaa fogaanta leh magaalada Tijuana, Mexico. Seattle waxa u shaqeeya nidaam bas oo kaawntiga oo idil ka jira oo leh goobo ka tirsan xaafadaha faras magaalada (downtown) oo basaska lagu raaco bilaash. Qorshaha Tareenka ee Sound (Sound Transit plan) ee doortayaashu oggolaadeen ayaa ku socda in u isku daro gaadiidka agagaaraha magaalo weynta Seattle iyaga oo isticmaalaya gaadiidka fudud (light rail), xadiid dadka qaada (oo hadda ka shaqeeya laga bilaabo Takooma iyo Everett illaa Seattle), oo ah 200 mayle oo daariiqyada HOV ah iyo jidadka basaska degdega ee degmada.

Adeegyada Dekadda

Dekadda Seattle ayaa ka mid ah tobanka ugu sareeya ee dekadaha weelka qufulani ka soo degaan Mareykanka, oo bucshiro lagu qiimeeyo \$36.7 bilyan ay ka gudbaan kaabiyadeeda sannad kasta. Waxa ka shaqeeya 29 maraakiibta wax qaada iyo hawlwadeeno doonyaha wax lagu raro, laba tareen of qaarado iskaga-gudub ah, iyo shirkado badan oo tarakyada ah oo isku xira Seattle iyo xarumaha suuqaqa dhammaantood Woqooyiga Ameerika Dekaddu waxay ku meegaarsan tahay ku dhawaad 500 ekar oo ah meelo lagaga shaqeeyo waxyaabaha soo dega, iyo 26 wiish qaada weel-sanduuyada iyo goobo loogu talagay waxyaabaha qabow ama wayaabaha la barafeeyey ee ka midka yihiin hilibka, kalluunka, khudradda, caleenta, iyo waxyaabaha keynta laga soo saaro, birta iyo badarka. Dhaqdhaqayada meheradda badda ee ka dhaca dekaddu waxay ka mas'uul tahay soo-galinta \$430 maalaayiin wax iibsiga agagaarka laga iibsato iyo \$2.5 bilyan oo dakhli meheradeed oo ay soo galiso dhaqaalaha agagaarka sannad kasta. Dekeddu waxa kale oo ay leedahay oo ay hawl-galiso Xero-Diyaradda Caalamiga ah ee Seattle-Takooma, Fishermen's Terminal iyo Xarunta Warshadaha Badda (Maritime Industrial Center), Marinada (Xerooyinka doonyaha yaryar) ee Gacanka Shilshole, iyo Bell Street Pier, oo ah xarun 11 ekar oo ka kooban xarun caalami ah oo lagu shiro, marina, dukaamo iyo maqaayado. Rugaha Bell Street Pier iyo 30 Terminal iyo meheradaha maraakiibta lagu tamshleeyo ee Alaska oo ay ku soo xirtaan 200 markab sannad kasta. Dhismaha Xarunta Ganacsiga Adduunka oo agteeda ah Bell Street Pier, yaa xoojineysa kaalinta doorka ay ku leedahay Seattle ahaanta xarunta ganacsiga ee adduunka

Terminaalka Kaluumeysatada

Rugta Kaluumeysatada ayaa hoy dekaadeed u ah maraakiibta kaluumeysiga Waqooyiga Basafiik ee Mareykanka iyo walibaxarun kobcaysa oo ah doonyaha ganacsiga lagu shaqeysto. Dayac-tiro lagu sameeyey dhowaan ayaa ayaa fursad u siinaya 2,500 fiit oo dheree ugu soo xirahso dooni iyo 320 goobo sibir ah oo dakad ku soo xirad sabbeeya ah. Rugta Kaluumeysatada ayaa waliba bixisa adeegyada taagerada ugu baaxadda weyn ee laga heli karo Xeebaha Galbeedka, oo leh dekada iska xajiya doonyo gaarya illa iyo 300 fiit iyo 2,800 fiit dherer oo deked raritaan leh, bakhaar xasilloon oo dibadda leh, qufulo gude leh, forklift-yo , wiiishiyo qalabyo kale oo yaal goobta. Goobta ayaa waxa ka mid ah meherado aad u kala duwan oo meesha ku yal oo adeega gaar ahaan baahida ganacsiga kalluumeysiga iyo shirkadaha doonyaha shaqada. Shirkadaha jaarka la ah ee Ballard, Magnolia, iyo xaafadaha Queen Anne ayaa waliba haya waxyaabaha bad mareenka, doonyo hagaajinta iyo adeegyada gaarka ah. Waxa ku dhow, Xarunta Warshad Ahaanta Waxyaabaha Badda oo haysa Doonyaha xakamaynta, dib u helid alaabaha , dayac-tirka iyo goobaha hagaajinta.

Garoonka-Dayaaradeed ee Seattle-Takoma

Garoonka-Dayaaradeed Taariikhdu markay ahayd 2004, 28.8 maalaayiin oo dad rakaab ah ayaa dhex maray Sea-Tac, iyada oo sidoo kale 346,966 metrik ton oo xammul ahna ay hawada u soo martay. Rakaabka dadka ayaa kor ugu kacay 7.5% sannadkii 2003, oo markii ugu horreysey ka badnaaday wixii ka horreyey heerarkii 9/11. Siddeed iyo llabaatan diyaarado ayaa ka shaqeeya Sea-Tac: 9 ka mid ah kuwaas ayaa wata calan dal shisheeye, 5 kalena waa diyaarado qaada xammulka. Garoonka-dayuuradaha waxuu u jira 13 mayle (21 km) degmada dhexe ee meheradaha oo waxa kale oo ay u jirtaa 14 mayle rugaha dekadada badda. Qaaradda ay Marekanku ku jirto, Sea-Tac waa garoonka-dayaaradeed ee ugu dhow Aasiya oo qiyaastii waxay qaadataa 9 saacadood in laga soo duulo Tokyo ama London oo la yimaad Seattle. Waxa jira in ka badan 45 duulitaan jadwalaysan ayaa sitimaan kasta ka jira kuwasoo taga meelo badan oo caalamka ka tirsan.

Diyaaradaha sida Tooska ah Caalamka ugu Duula

Air Canada	Alaska Airlines	China Air	Korean Air
Aeromexico	American Airlines	EVA Airlines	Northwest Airlines
Air BC	Asiana Airlines	Lufthansa	SAS Scandinavian Airlines
Air France	British Airways	Horizon	United Airlines

Magaalooyinka Duulitaannada Sida Tooska uga Yimaad Seattle

Amsterdam	Kelowna	Puerto Vallarta
Beijing	London	Seoul
Calgary	Los Cabos	Taipei
Cancun	Mazatlan	Tokyo
Copenhagen	Mexico City	Toronto
Edmonton	Moskow	Vancouver
Frankfurt (April 1, 2008)	Paris	Victoria

Ka Fogaanshaha Magaalooyinka Waaweyn (maylka cirka)

	Tokyo	Hong Kong	Chicago	New York	London
Seattle	4,785	6,639	1,726	2,406	4,792
San Francisco	5,135	6,957	1,851	2,571	5,355
Los Angeles	5,570	7,343	1,743	2,456	5,443

Isha laga soo xigtay: Dekedda Seattle, Qaybta Duulitaanka

ISGAARSIINTA

Jaraa'iddada Agagaaraha Seattle

(Iibsigooda ugu dhowaan)

	Malmo Shaqo	Axadda		Malmo Shaqo	Axadda
Seattle Times	234,274	(469,853)	International Examiner*	10,000	
Seattle Post-Intelligencer	150,876	(469,853)	Korea Central Daily†	10,000	
The News Tribune (Tacoma)	116,150	(123,213)	Korea Times	10,000	
Seattle Weekly*	113,000		La Voz*†	10,000	
The Stranger*	95,000		Northwest Asian Weekly*	10,000	
Everett Herald	51,000	(56,000)	NW Vietnamese Weekly*†	10,000	
The Sun (Bremerton)	31,589	(37,517)	North American Post†	8,000	(15,000)
King County Journal	49,000	(49,000)	Daily Journal of Commerce	5,500	
Puget Sound Business Journal	17,000		Seattle Chinese Post*†	5,000	
Seattle Medium	37,500		El Mundo*†	30,000	

*usbuucle, laba usbuucle ama bille †Daabaca aan Ingriisiga ahayn

Telefishinka iyo Raadiyaha

Dhammaan shirkadaha waaweyn ee TV-ga ayaa laamo ku leh Seattle. Adeegga Keybal (cable) ayaa jira iyada laga isticmaalayo Comcast Cablevision iyo TCI Cablevision.

KOMO-TV 4 (ABC)
KING-TV 5 (NBC)
KIRO-TV 7 (CBS)
KCTS-TV 9 (PBS)

KSTW-TV 11 (The CW)
KCPQ-TV 13 (Fox)
KTZZ-TV 22 (Warner)
Seattle Cable 21 (kanaalka Dawladda hoose)

Qiyaas ahaan waxaa Seattle ka jira 45 AM iyo FM saldhig raadiyowku waasoo baahiya muusik, warar iyo waxyaabaha ka dhaca agagaarka Seattle.

DAWLADAHA

Xafiisyada Qunsulliyadaha Dalalka Shisheeyaha ay ku Leeyihiin Seattle

Australiya	+1 (206) 575-7446	Latvia	+1 (425) 773-0103
Austriya	+1 (360) 466-0252	Lithuania	+1 (206) 725-4576
Belgium	+1 (206) 728-5145	Luxembourg	+1 (425) 822-4607
Bolivia	+1 (206) 244-6696	Malta	+1 (425) 788-3120
Kambodia	+1 (206) 217-0830	Mexico	+1 (206) 448-3526
Kanada	+1 (206) 770-4060	The Netherlands	+1 (425) 637-3050
Chile	+1 (360) 754-8747	New Zealand	+1 (360) 766-6791
Krooshiya	+1 (206) 772-2968	Norway	+1 (206) 284 2323
Saybras	+1 (425) 827-1700	Peru	+1 (206) 714-9037
Itoobiya	+1 (206) 364-6401	Russian Federation	+1 (206) 728-1910
Estoniya	+1 (206) 310-2153	Seyshelles	+1 (253) 874-4579
Finland	+1 (425) 885-7320	Isbayn	+1 (425) 237-9373
Faransiiska	+1 (206) 256-6184	Sweden	+1 (206) 467-8200 ext 330
Jarmalaka	+1 (206) 230-5138	Switzerland	+1 (206) 228-8110
Hangary	+1 (425) 739-0631	Xafiiska Dhahqaalaha iyo	+1 (206) 441-4586
Aysland	+1 (206) 783-4100	Dhaqanka Taipei	
Talyaaniga	+1 (206) 349-4411	Turkey	+1 (425) 739-6722
Jameyka	+1 (253) 872-8950	Yuganda	+1 (206) 571-9789
Japan	+1 (206) 682-9107	Boqortooyada Ingriiska	+1 (425) 453-9400
Korea, Jamhuuriyadda	+1 (206) 441-1014	Uzbekistan	+1 (206) 625-1199

Ururka Qunsulka Washington: (206) 728-5145 (Qonsulka Beljiyam)

Waaxyada Dawladda Federaalka iyo Hay'adaha Xafiisyadooda Laamaha Seattle ee La Soo Xushay

Waaxada Ganacsiga, Xafiiska Tirokoobka, Maamulka Horumarinta Dhaqaalaha, Maamulka Ganacsiga Caalamiga , Maamulka Qaranka Bad-Weynta iyo Hawada)

Waaxda Ammaanka Dalka-Hooyo (Kastomka & Xad-Ilaalinta Mareykanka, Ilaalinta Xeebaha, Adeegyada Muwaadinnimada Iyo imigreeshinka Mareykanka, Adeegga Nabadsugidda)

Banigiga Keydka Federaalka ee San Farancisko
Waaxda Maaliyadda
Waaxda Gaadiidka
Waaxda Arrimaha Dibadda (Hay'adda Baasaboorka)
Waaxda Shaqada
Waaxda Beeraha

Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Dadka Hay'adda Ilaalinta Be'adda.
Waaxda Ciidamada
Waaxda Horumarinta Guryaha iyo Beladka Arrimaha Ciidamada Ka soo Shaqeeyey
Waaxda Cadaaladda

King Kaawnti

King Kaawnti waa kaawntiga 13^{aad} ee marka la eego kaantiyada loogu badan yahay ee dalka, waxayna leedahay dawladda labaad ee ugu weyn Gobolka Washington, oo leh 1.8 maalaayiin oo dad ah oo ku nool 2,200 mayle oo kooban. Hoggaanka kaawntiga waxa soo doorta dad weynaha , halka Guddiga Kaawntiga ay soo doortaan degmooyinku. Waxa jira sagaal xubnood oo ka mid ah Guddiga Kaawntiga oo sida Hogganka oo kale dadka u adeega muddo afar sano Dawladda King Kaawnti ayaa haysa hawlaha maamulka degmada iyo kormeerka adeegyada cadaaladda dambiyada, Adeegyada basaska Metro transit, maamulka biyo-qashinka iyo qashinka adag, cafimaadka dadweynaha iyo adeegyada dadka iyo doorashooyinka.

Dekedda Seattle

Dekeddu waxay leedahay shan guddon-wadayaal oo dadku ku nool King Kaawnti ka soo doortaan, oo jagadan haya mudo afar-sanadoodis dul-yimaad ah. Dekedda ayaa maamusha Garoonka-Dayaaradda Caalamiga ee Seattle-Tacoma, Goobaha Hawalaha Badda, Rugta Kaluumeysatada.

Magaalada Seattle

Duqa Magaalada iyo sagaal-xubno Guddi Magaalo ayaa dadku soo doortaan muddo shaqeyn afar sano ah. Xafiisyadu waa bilaa-ka-tirsanaan xisbi. Guddiga magaaladu muddada ay shaqeynayaan oo ay isdul-yimaadaan oo la qabtaa sannad kasta oo tiro kisi ah.

Duqa Magaalada:

Greg Nickels

Doorashada

Xigta

2009

Guddiga Magaalada:

Tim Burgess	2011	Jan Drago	2009	Nick Licata	2009
Sally Clark	2011	Jean Godden	2011	Richard McIver	2009
Richard Conlin	2009	Bruce Harrell	2011	Tom Rasmussen	2011

Darajeynta Bond-ada Magaalada

Standard & Poor ayaa Magaalada ku qiimeysey darajada AAA ee ku aadan waajibaadkeeda guud ee cashuurta xaddidan iyo kuwa aan xaddidneyba. Moody's ayaa wuxuu asna ku qiimeeyey Magaalada waajibaadkeeda guud ee cashuurteeda xaddidan iyo kuwa aan xaddidneyba inay yihiin siday isku daba xigaan Aaa iyo Aa1. Fitch Ratings ayaa ku qiimeeyey Magaalada waajibaadkeeda guud ee cashuurteeda xaddidan iyo kuwa aan xaddidneyba inay yihiin siday isku daba xigaan AAA iyo AA+.

Miisaaniyadda Magaalada oo Kooban (2007, Miisaaniyadda la Ansixiyey)

U-Qoondoynta

Maamulka	495,488,000
Frashaxan, Dhaqanka & Madaddaaloooyinka	240,732,000
Adeegyada Caafimaadka & Dadka	148,913,000
Xaafadaha & Horumarka	131,350,000
Ammaanka Dadweynaha	471,621,000
Isticmaallada & Gaadiidka	1,898,008,000
WADARTA U QOONDEYNTA	\$3,510,541,000

Dakhli

Ku-Dallacayada Adeegyada & Sicirka	1,214,437,000
Isticmaallada	
Cashuuraha, Ku Soo Rogga Cashuuraha iyo Bond-yada	1,091,767,000
Dakhliyada Kale	431,270,000
Kala wareejinta Waaxaha	178,021,000
Batantiga, Ogolaanshaha, Ganaaxyada, Ujrooyinka	161,081,000
Dakhliga Korsarka	153,039,000
Isticmaal Baaqiyada Miisaaniyada & kuwa Kale	145,519,000
Dakhli ka Yimid Meelaha kale Shacabka	135,407,000
WADARTA DAKHLI	\$3,510,541,000

Isha laga soo xigtay: Magaalada Seattle, Waaxda Maaliyadda,

** Xusuuso in u qoondaymaha ay ka mid yihiin isku biximaha waaxyada dhexdooda, tan ayaa loo qaadanayaa faraaq u dhexeeya u-qoondaymaha iyo dakhliyada*

Macluumaad Dheeraad ah

Xafiis/Hay'ad	Taleefan	Barta Shabakadda
Magaalda Seattle: Hagaha Caawin Magaalo	+1 (206) 684-2489	www.cityofseattle.gov
Xafiiska Duqa Magaalada	+1 (206) 684-4000	www.cityofseattle.gov/mayor
Xafiiska Horumarinta Dhaqaalaha	+1 (206) 684-8090	www.seattle.gov/economicdevelopment
Xafiiska Farshaxanka iyo Arrimaha Dhaqanka	+1 (206) 684-7171	www.seattle.gov/arts
Maktabadda Dadweynaha	+1 (206) 386-4636	www.spl.org
Korantada Magaalada (City Light)	+1 (206) 684-3000	www.seattle.gov/light
Xafiiska Film-ka Iyo Muusikada	+1 (206) 684-0903	www.seattle.gov/filmandmusic
Enterprise Seattle (Howlaha Seattle)	+1 (206) 389-8650	www.enterpriseseattle.org
Guddoonka Ganacsiga Magaalo-Weynta Seattle	+1 (206) 389-7200	www.seattlechamber.com
King Kaawnti: Waxada Xiriiriyada Meheradaha iyo Horumarinta	+1 (206) 205-0700	www.metrokc.gov/exec/bred

Dhaqaalaha		
Dekedda Seattle	+1 (206) 728-3000	www.portseattle.org
Ku Shuraakow Barwaaqo (Prosperity Partnership)	+1 (206) 587-5663	www.prosperitypartnership.org
Guddiga Degaanka Puget Sound	+1 (206) 464-7090	www.psrc.org
Ururka Iibiyeyasha Guryaha ee Seattle-King Kaawnti	+1 (425) 974-1011	www.nwrealtor.com
Xafiiska Booqdeyaasha iyo Shir-Weynaha Seattle-King Kaawnti	+1 (206) 461-5840	www.visitseattle.org
Xarunta Macluumaadka Maamulka Meheradaha Yar-Yar	+1 (206) 553-7310	www.sba.gov/wa/seattle
Gobolka Washington Waaxda Horumarinta Beesha, Ganacsiga & Horumarinta Dhaqaalaha	+1 (360) 725-4000	www.cted.wa.gov
Horumarinta Ganacsiga iyo Isbahaysiga Magaalo-Weynta Seattle	+1 (206) 389-7301	www.seattletradealliance.com
Xafiiska Tirakoobka Mareykanka, Xafiiska Degmada Seattle	+1 (206) 381-6200	www.census.gov/rosea/www
Maamulka Horumarinta Dhaqaalaha ee Mareykanka, Xafiiska Degmada Seattle	+1 (206) 220-7660	www.eda.gov/AboutEDA/Regions.xml
Xarunta Gacan-Qabashada Dhoofinta ee Mareykanka	+1 (206) 553-5615	www.buyusa.gov/seattle

Waraq-Xogeedka Magaalo-Weynta Seattle waxa soo diyaariyey Xafiiska Xiriirinta Dowlad-u-Dhexaadka (The Greater Seattle Datasheet). Ra'yigaaga waa la soo dhaweynayaa.

Taleefan: +1 (206) 684-0213 Fax: +1 (206) 684-8267 TDD: +1 (206) 684-8118 (Dadka maqalkoodu adag)